

MANCHESTER MOVE ISBEDEL AYAA KKU DHACAYA

Nidaamka 'Manchester Move' wuxuu bilaabmay sanadkii 2011. Tan iyo markaas, guryo bulsho oo tiro yar ayaa diyaar hayd banaan inay dadku kireystaan, kor u kac balaaran ayaa ku yimid guri la'aan iyo dad badan oo ku soo biiray Manchester Move oo rajeynaya inay helaan guri bulsho.

Kawnsalka iyo Manchester Move waxay badalayaan sharciyada si dad badani fursad wanaagsan ugu helaan guri bulsheed.

Sharciyada cusubi waxay bilaabmayaan 3da Noofambar 2020.

Sharciyada cusub ee nidaamka ayaa lagu dabakhi doonaa qof walba.

Dadka leh codsi Manchester Move uma baahna inay sameeyaan codsi cusub.

Dadka qaar waxaa laga yaabaa in laga codsado inay bixiyaan maclummaad dheeri ah si codsigooda ugu jiro kooxda ugu sareysa ee ay noqon karto.

Waa lagama maarmaan in codsiyada la cusbooneysiyo, waxaan kugula talineynaa in qof walba uu hubiyo in maclummaadkiisu sax yahay oo la cusbooneysiyyey.

Dawladda hoose iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa dhisayaan guryo cusub, laakiin waxay qaadanayaan waqtii ay ku dhammaystiraan, markaa waa muhiim in dadku ay macquul ku yihiin doorashada guryahooda.

Waxaa jira talo aad u wanaagsan oo ku saabsan websaydhka Manchester Move ee ku saabsan bidding iyo fursadaha kale ee guryaha.

Haddii aad hesho fariin ku saabsan codsigaaga Manchester Move, fadlan la xiriir shirkadda guryaha bixisa ee ka shaqeysa arjigaaga. Faahfaahinta waxay ku jirtaa warqadda "ku soo dhowow Manchester Move" ee aad heshay markii aad dalabka sameyneysay.